



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI Lr. 17

TAARIKH: 27/06/2016

**DHISMAHA HAY'ADDA MAARAYNTA
MASIIBOYINKA SOOMAALIYEED**

MADAXWAYNAHA J.S.

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S
- MARKUU ARKAY:** Sharci Lr. 16 ee soo baxay 01/04/1970 kuna saabsan Hay'adaha Madaxabanaan waxna looga beddelay Sharci Lr. 36 ee soo baxay 22/04/1972
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoonka Goalaha Shacabka Lr. 1284/3/1/9/16 ee soo baxday 14/02/2016 kuna saabsan Ansixinta Sharciga Dhismaha Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka Soomaaliyeed
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la dhiso Hay'addaan si dadwaynaha Soomaaliyeed looga badbaadiyo Masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa ay gaystaan aadanaha

Waxuu Madaxwaynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday ansaxinta Golaha Shacabka ee Sharciga Dhismaha Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka.

Qodobka 2aad

Waxuu Xeerkaan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaa la baabi'yay sharci iyo xeer kasto eek a soo horjeedo waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho 27/06/2016



Madaxwaynaha J. F.S
Xasan Sheekh Maxamuud



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 1284/3/1/9/16:الرقم

Mogadishu, 14th February 2016 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka.
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobollada iyo Amniga
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka

M.ne Madaxweyne;


Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad ee Fadhigiisii 35aad ee 14^{ka} Febraayo 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 129 (Boqol Labaatan iyo Sagaal).
- Xildhibaan diidey: 5 (Shan Xildhibaan)
- Xildhibaan ka aamustay 6 (Lix Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaam diiran iyo qaddarin gaar ah.

M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka




MJ/AM

ANSIXINTA SHARCIGA MAAREYNTA MUSIIBOORYINKA.

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 140: Oggol (129) Diidmo (5) ka aamustay (6)



Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 14th February 2016


Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS



Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar

Taariikh: 14th February 2016

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS



Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad



Taariikh: 14th February 2016



JAMHUUDDA FEDERAANKA SOOMAALIYA
Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobollada & Amniga Qaranka ee
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Tr.10.02.2016

Warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada iyo Amniga ee
Hinise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareeynta Musiibooyinka.

Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

**Ujeedo: Warbixin la xirriirta Hinise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda
Maareeynta Musiibooyinka.**

Mudane Guddomiye,

Mudanayaal,


Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada iyo Amniga waxaa sharaf u ah
in ay idiin soo gudbiyaan warbixintan ku saabsan mowduuca ujeedadiisu ay kor ku
xusan tahay, iyadoo la tixraacayo Qodobka 68 (3) ee Dastuurka iyo Qodobada 61
iyo 62 ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.

Mudane Guddomiye,

Mudanayaal,

Hadii aan Hordhac yar ka bixiyo Hay'addaan,

Hay'adda Maareeynta Masiibooyinka Soomaaliyeed (SODMA) waxaa la
aas-aasay August 03, 2011, kadib markii ay dhacday abaartii ku dhufatay
Gobollada Koonfurta iyo Bartamaha Dalka, tobonaan kun oo barakacayaal ah si
xoogle ugu soo qul-quleen magaalada Muqdisho, ayagoo aan haysan wax Hooy,
Cunno, Biyo IWM, si ay u maareeyso waxna uga qabato dhibaataadaas, sidoo



①

kalena ay ka hortagto ama ay yareyso musiibooyinka iyo khataraha kale ee Dalka ka dhici kara mar kasta.

Haddaba, hay'addaas oo lagu aas-aasay go'aan Gole Wasiiro & Dekreeto Madaxweyne, hase yeeshee aan laga ansixin Sharciyadeeda Golaha Shacabka,

Mudane Guddomiye,

Mudanayaal

Hinise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareeynta Musiibooyinka. Wuxuu soo maray marxalooyin kala duwan sida aad ku arki dontaan lifaaqa la socda warqadaha.

1. Warqadda Sumadeeda tahay SODMA/0037/13 kuna taariikheysan 24/04/2013 ee ka soo baxday xafiiska Hay'adda, taas oo caddeeyneyso baahida ay hay'adda u qabtay Sharcigaan.
2. Sharcigaan wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay soo saartay 30/04/2013 sida ku cad warqada sumadeeda tahay WAG&AQ/XW/00160/13 kuna saxiixnaa wasiirkii markaas M.ne Cabdikariim Xusen Guuled, taas oo lagu soo gudbiyay Hindhise Sharciyeedkaan.
3. Hindise Sharciyeedkaan oo Baarlamaanka soo galay 22/06/2013 kuna soo galay Warqadda Sumaddeedu tahay XRW/GB/00332/06/13 kuna saxiixnaa Ra'iisul wasaare M.ne Cabdi faarax Shardoon Saacid.

Mudane Guddoomiye,

Mudanayaal

1. Sharcigaan Aqrintiisii 1aad wuxuu maray Baarlamaanka 06/10/2013
2. Aqrintiisa 2aad wuxuu maray 27/11/2013. Wixii ka dabeeyay waqtigaas waxaa dib ula noqday Xukuumaddii jirtay waqtigaas.

Mudane Guddomiye,

Mudanayaal

1. Waxaa Sharcigaan lagu soo celiyay Gacanta Baarlamaanka Asagoon waxba laga soo badalin 27/05/2015 sida aay Caddeeyneyso Warqadda Sumadeedu tahay XRW/000076/05/2015 ee ku saxiixan yahay Ra'iisul wasaare M.ne Cumar Cabdirashid Cali Sharma'arke.
2. Hadaba waxaan la tashiga Guddoomiyaha kadib gar-waaqsanay in la marsiiyo Aqrintiisa 3aad baahida ay hay'addu u qabto Sharcigan dardardar.

Guddoomiye K/Xigeenka Guddiga ahna Ku Simaha Guddoomiyaha

Xil. Daahir Amiin Jeesow

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xukuumadda Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha



جمهورية الصومال الفيدرالية
الحكومة الصومال
مكتب رئيس الوزراء

(The Government of Federal Republic of Somalia)

Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/0000 7/6/05/2015

Taariikh: 27/05/2015

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F. Soomaaliya

=Muqdisho=

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F. Soomaaliya

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

Ujeedo:- Codsi in Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta
Musiibooyinka uu Halkiisa Ka Sii Socdo

② Xof. Guud.
u gudbi
Guud. An.
Gudona oo
waxay ka
halka
keentani
off.
8/2/16

Mudane Guddoomiye,

Annagoo tixraacayna warqadda summaddeedu tahay WAG&F/XW/0042/15 ee March 18, 2015, ee ka soo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalkuna kuna saabsanayd in Hindise sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta Musiibooyinka dib loogu celiyo Golaha Shacabka si loo marsiiyo akhrinta 3aad, ka dibna loo ansixiyo.

Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye, waxa aan si xushmad iyo qaddarin leh kaaga codsanaynaa in Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maamreynta Musiibooyinka uu halkiisii ka sii socda si loo ansixiyo, maadaama baahi weyn loo qabo meel marintiisa.

Naga Guddooma Salaan Diirran iyo Qaddarin



Mudane Maxamed Cumar Cabdullah
Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Xukuumadda
Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

① Xof. Guud.
Fadlan fududaa
Geli oo kaabo
Soo dero
Ujeedada
off.
27/5/15

27/5/2015
6.25
Ismaciil

④



Tixraac: XRW/0000 76/05/2015

Taariikh: 27/05/15

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F. Soomaaliya =Muqdisho=

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F. Soomaaliya =Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=


Ujeedo:- Codsii in Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta
Musiibooyinka uu Halkiisa Ka Sii Socdo


Mudane Guddoomiye,

Annagoo tixraacayna warqadda summaddeedu tahay WAG&F/XW/0042/15 ee March 18, 2015, ee ka soo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka kuna saabsanayd in Hindise sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta Musiibooyinka dib loogu celiyo Golaha Shacabka si loo marsiiyo akhrinta 3aad, ka dibna loo ansixiyo.

Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye, waxa aan si xushmad iyo qaddarin leh kaaga codsanaynaa in Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maamreynta Musiibooyinka uu halkiisii ka sii socda si loo ansixiyo, maadaama baahi weyn loo qabo meel marintiisa.

Naga Guddooma Salaan Diirran iyo Qaddarin


Mudane Maxamed Cumar
Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Xukuumadda
Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya





Somali Republic
Federal Government
Ministry of Interior & Federal Affairs
Office of the Minister

Ref: WAG&F/XW/0042/15

Date: March 18, 2015

Ku:- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda FS :

"Muqdisho"

Ujeedo:- Soo Gudbin Hindise-Sharciyeedka
(Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka).

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Salaan kadib, waxaan halkaan kuugu soo gudbinayaa lifaaqa ah -Hindise-Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed- oo Dowladdii hore ay ku dhistay Wareegtadii Ra'iisul Wasaaraha Lr.Ref: XRW/782 ee 3dii August 2011, iyo Dekereto Madaxweyne Lr. 366 ee 09/08/2012, ka dibna G/Wasiiradu mar kale ku ansixiyeen Shirkoodii: SHGW. 00.30.05.13 ee 30/05/2013, R/Wasaaruhuna ugu gudbiyey Baarlamaanka warqad Lr. XRW/GB/00332/6/2013.

Kadib u gudbintii Golaha Baarlamaanka Hindise-Sharciyeedka Dhismaha Hay'addu wuxuu maray akhriskii 1-aad & 2-aad ee Baarlamaanka waxaana u dhimaa oo keliya akhriskii 3-aad ee ansixinta.

Dabayaaqadii sanadkii 2014, waxaa Hindise-Sharciyeedka Dhismaha dib ula soo laabtay R/Wasaarihii & Wasiirkii hore ee Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, sidaasna ayuu Baarlamaankii ugu soo keliyey Wasaaradda oo ilaa iyo hadda u yaallo Hindise-Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda.

Sidaas darteed, Mudane Ra'iisul Wasaare, waxaan si qadarin mudan kaaga codsanayaa in Hindise-Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed oo ah Hay'ad heer Qaran oo aan dib u habeyn kooban ku soo sameeynay, in aad dib ugu gudbiso Baarlamaanka Federaalka si loo marsiiyo akhriskii 3-aad kadibna loo ansixiyo, si Hay'addu u gudato waajibaadka ballaaran ee Qaran ahaan sharcigeedaan loogu xil saarayo, shaqaateheedana ay u helaan xuquuqdooda shaqaalenimo oo lagu xiray Ansixinta sharcigaas, iyadoo aad ogsoon tahay in Hay'addan ay caalamka oo dhan ka jirto, dalkeenana howlaheeda aad baahi weyn looga qabo.

F.G: (Fadlan Eeg Lifaqa).

Wada Shaqeyn Wada



Md. Cabdiraxmaan Maxamed Xuseen
Wasiirka Wasaaradda

Address: Via-Tanzania, 888 Building,
Tel: +252-..... / +252-..... Email:..... Mogadishu-Somalia



Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka J. F. Soomaaliya


Ujeedo:- Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Hay'adda Maareynta Masiibooyinka

Mudane Guddoomiye;

Waxaan halkaan si xushmad leh kuugu soo gudbinayaa Hindise Sharciyeedka Hay'adda Maareynta Masiibooyinka ee u gumashada Dadka ku tabaalooba oo waxyeelladu ka soo gaarto dhacdooyinka dabiiciga ah ee xagga Alle ka yimaada; hindise sharciyeedkanna waa mid si cad oo qaabaysan isu fahiraya; waafaqsanna Dastuurka, ujeeddadiisuna ay caddahay.

Haddaba, Mudane Guddoomiye; waxaana si xushmad leh kaaga codsanayaa ansaxinta hindise sharciyeedkan kor ku xusan.

Mahadsanid


Mudane Cabdi Faarax Shirdoon (Saacid)
Ra'iisul-Wasaaraha xukuumadda FS

Jumhuuriyadda Soomaaliya
Xukuumadda Federaalka
Wasaaradda Arrimaha Gudaha
& Amniga Qaranka
Xafiiska Wasiirka



جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة الشؤون الداخلية والأمن القومي
مكتب الوزير

Somali Republic
Federal Government
Ministry of Interior & National Security
Office of the Minister

Ref: WAG&AQ/XW/00160/13

Date: April 30, 2013

Ku: Ras'iisul Wasaaraha Xukuumadda F.J.S =Muqdisho=

**Ujeeddo:- Soo Gudbin Hindise- Sharceedka dhismaha
Hay'adda Maareeynta Masiibooyinka.**


Mudane Ra'iisul Wasaare,

Salaan diiran kadib, waxaan halkaan kuugu soo gudbinayaa lifaaqan ah Hindise-sharciyeedka dhismaha Hay'adda Maareeynta Masiibooyinka Soomaaliyeed oo Xukuumaddii hore ay dhistay Augusto 03, 2011, mudadii ay jirtayna qabatay howlo waa weyn oo qaran oo muhiim ah, hase yeeshee aan sharci rasmi ah loo sameeynin, golaha baarlamaanka cusubna uu ku xiray miisaaniyad siintooda in la soo dhameystiro sharciyeeynteeda.

Sidaas darteed waxaan kaa codsanayaa in la hordhigo Golaha Wasiirada kadibna loo gudbiyo Golaha Shacabka Qaranka si loo dhamaystiro sharcinimada Hay'addaas.

Mahadsanid

Md. Cabdikariin Xuseen Guuleed
Wasiirka Wasaaradda





The Transitional Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref:XRW/000000.782/08.11

Date: 03.08.2011

Re: Disaster Management Agency

Following up the Council of Ministers' proposal Ref. No. **SHGW.00.48.06.11** dated **30th June 2011** to establish a Ministerial Committee to respond to the dire drought in the Country.

Having considered the urgent need to manage disaster and the responsibility of the government towards the drought situation and the people fleeing from their homes due to the current famine stage.

Having assessed the current famine situation in the country and the proposals of setting up **Disaster Management Agency** from the humanitarian assistance Ministerial Committee.

After Considering Article 48, section 1, b of the Transitional Federal Charter

I decided to set up an Independent Disaster Management Agency and nominate individuals that are well known within the community and have the confidence of the people to lead the agency.

1. Abdullahi Mohamed Shirwa - Chairperson
2. Jamal Mohamed Barrow - Deputy Chairperson for Programs
3. Abdihakim Ahmed Guled - Deputy Chairperson for Management
4. Ali Abdirahman Ahmed - Head of Logistics

The new Disaster Management Agency is expected to manage all disaster issues within the country, and in particular the current famine situation; and to come up with short and long term strategies to prevent, response and manage disasters' facing our nation.


H.E. Dr. Abdiweli Mohamed Ali
Prime Minister



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA MAAREYN
MASIIBOYINKA SOOMAALIYEED**

Sharci Lr: _____ ee _____

**Qodobka 1aad:
Dhismaha Hay`adda**

1. Waxaa Sharcigan lagu dhisay Hay`ad Dowladeed oo lagu magacaabo “Hay`adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed” oo marka magaca la soo gaabiyo noqonaya (SODMA) oo u taagan (Somali Disaster Management Agency).
2. Astaanta Hay`adda waa: magaca hay`adda oo la soo gaabiyay oo khariidada Soomaaliyana ay ku dhex taallo xarafka “o” oo kalar casaan qafiif ah ku xar-dhan yahay.
3. Xarunta Hay`addu waa Caasimadda Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya ee Muqdisho, waxayna adeegeedu ku baahsanaan doonaa dhammaan D/goboleedyada, Gobollada iyo degmooyinka dalka oo idil.
4. Hay`addu waa u madax-banan tahay gudashada xilkeeda, waxayna leedahay shakhsiyad Sharciyeed oo u gaar ah oo ay ku dacwoon karto laguna dacweeyn karo.
5. Hay`addu waxay heshiisyo iyo is-afgarad la geli kartaa Hay`adaha dhigeeda ah ee heer goboleed iyo heer caalami ah.
6. Hay`addu waxay hoos imaanaysaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka, oo ku leh kormeer, toosin, tilmaan iyo in laga siiyo warbixino joogta ah, Waxaana la xisaabtan kala dhexeyaa Baarlamaanka Federaalka ee Soomaliya.

**Qodobka 2aad:
Aragtida iyo Fariinta Hay`adda**

1. Hay`adda SODMA waxaay hiigsanaysaa in uu mujtamaca Soomaaliyeed ka badbaado naf & maalba masiibooyinka dhaca isla markaasna adkeysi u yeesho hadii masiibi ku dhacdo, lana gaarsiiyo nolol qiimo iyo wax tar leh, aydoo horumarinaysa xirfado si deg deg ah uga jawaabaya musiibooyinka dabiiciga & kuwa aan dabiiciga ahayn ee dalka ka dhaca.
2. Fariinta hay`adda waa in ay maamulayso dhammaan arrimaha musiibooyinka kuna jaangoynayso qorshe looga taxadiraayo noocyada kala duwan ee musiibooyinka isla markaasna horumarinayso awoodaha xirfada qeybaha kala duwan iyo sidoo kale hay`adaha ku shaqada leh si loo sii odoroso masiibada loogana tababusheeysto ka hortageeda ama yareynteeda inta aysan galaafan nololsha dadka iyo duunyadaba.

Qodobka 3aad:
Ujeedooyinka Hay'adda

1. Ka Baddadinta iyo ka samata bixinta bulsha Soomaaliyeed naftooda iyo hantidooda masiibooyinka dalka ka dhaca isla markaasna laga saro xaaladaha nugul ee u adkaysi la'aanta masiibooyinka qaarkood.
2. Maareynta iyo Maamulidda dhammaan Masiibooyinka dabiiciga iyo kuwa dadku sababaan ee ka dhaca dalka.
3. Diyaarinta Qorshe howled xilliyada dhow iyo midka fog ee looga hortegaayo ama lagu yareeynaayo si degdeg ahna loogana jawaabaayo dhammaan masiibooyinka dalka ka dhaca.
4. Diyaarinta xarumo iyo goobo Gobollada & Degmooyinka dalka oo laga maareeyo lagana maamulo Masiibooyinka ka dhaca Goobahaas.
5. Abaabulidda & howl gelidda kooxo iyo qaybo awoodi kara ka hortegidda iyo ka jawaabidda degdega ah ee masiibooyinka.
6. In la uruuriyo xogaha ku saabsan khataraha masiibooyinka lagana bixiyo digniino hore waqti ku haboon.
7. Ujihaynta hay'adaha samafalka hadba baahiyaha degdega ka shaqeeya arrimaha masiibooyinka iyadoo latixgelinaayo mudnaanta baahidaas.
8. In la dejiyo Siyaasad qaran ee ku aadan Maaraynta Masiibooyinka dalka.
9. In hay'adada Maaraynta Masiibooyinku noqota wadiiqada keliya ee iskaashiga lagula sameeyo ee hay'adaha dowliga iyo kuwa aan dowliga aheyn ee arrimaha la xiriira maareynta masiibooyinka.
10. In la sameeyo daraasad la xiriira sabaha keena Masiibooyinka si loo turxaan bixiyo loogana hor tago soo noqnoqashadooda.

Qodobka 4aad:
Mabaadi'da Hageysa hay'adda

Hay'adda markay fulineyso siyaasaddeeda ku aadan maareynta masiibooyinka ee heer qaran, waxay tixgelinaysaa mabaadi'da hoos ku qoran, iyadoo mabaadi'daas la dhexgelinayo qorshaha horumarineed ee dalku leeyahay:

- a. In mudnaan gooni ah la siiyo dadka birimageydada ah sida carruurta, dumarka, waayeelka, nafada iyo dadka laga tirada badanyahay.
- b. In la kobciyo dhaqanka & wacyiga u diyaargarowga masiibooyinka & ka fogaashaha khataraha ee heerarka kala duwan ee bulshada.

- c. In la raaco qaababka adeegsiga aqoonta kala gedisan ee qeybaha kala duwan ee bulshada iyo in la isku dhafo aqoonta cilmiga iyo waxqabadka farsamo.
- d. In la kobciyo waxyaabaha la xiriira nolasha joogtada ah ee dadka ku nool meelaha masiibooyinka dabiiciga ah u badan yihiin.
- e. In la abuurto lana xoojiyo xiriirka u dhexeeya hey'adaha kala duwan sida hey'adaha dowladda, ganacsiga gaarka ah, warbaahinta, hey'adaha aan dowliga ahayn (NGO-yada) bulshada rayadka, hey'adaha Qaramada Midoobey iyo deeqbixiyaasha ee la xariira arrimaha masiibooyinka.
- f. In iskaashi lala yeeshowaddamada kale iyo guud ahaan beesha caalamka si loo hormariyo yareynta qataraha ka iman kara masiibooyinka.
- g. In la helo awood waxqabasho iyo mid farsamo iyadoo maskaxda lagu hayo meelaha masiibooyinka ka jiraan ee dalka.
- h. In la diyaariyo qorsheyaal ku jaango'an maareynta qatarta masiibooyinka laga soo bilaabo heer tuulo ilaa qaran.

Qodobka 5aad:

Xassaanadda ay leedahay Hay'adda

Dhismooyinka iyo xafiisyada Hay'adda lama baari karo iyadoo ogolaansho laga haysan Maxkamad heer Federaal.

Qodobka 6aad:

Qaab-dhismeedka Hay'adda SODMA

1. Hay'addu waxay lahaanaysaa Guddi maamul oo ka kooban Guddoomiye iyo hal Ku-xigeen, Sadax (3) Agaasime Guud oo lagu soo magaacabo soo jeedinta Golaha Wasiiradda oo dhegaystay talada Wasiirka Arrimaha Gudaha & Federaalka, waxaana Dekreeto ku soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
2. Hay'addu waxaa kaloo ay lahaanaysaa shaqaale xarunta iyo Wakiilo D/Goboleedyada Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.
3. Faahfaahinta qaab-dhismeedka Hay'adda & howlaha qeybaha waxaa lagu soo saarayaa xeer gaar ah.

Qodobka 7aad:

Howlaha iyo awoodaha Hay'adda

Hay'addu, iyadoo fulinaysa kuna dhaqmayso siyaasadda iyo barnaamijyada guud ee Dawladda ee ku aadan arrimaha la xiriira masiibooyinka la soo gudboonaada

bulshada kuwa dabiiciga ah iyo kuwa aan dabiiciga ahaynba ee sababa khasaaro naf, maal, barakac iwm, waxay si gaar ah ugu xilsaaran tahay:

1. Diyaarinta qorsheyaasha iyo barnaamijyada heer Qaran ee ku aadan Masiibooyinka sida: ka- hor-taga, yareynta, ka-jawaabidda deg-dega ah iyo dib-uga-soo-kabashada.
2. Ururinta xogaha iyo warbixinada Masiibooyinka iyo khataraha ku soo fool leh dalka iyo ka bixinta digniinaha hordhac ah iyadoo lala kaashanayo Hay'adaha ku hawlan arrimahaas ee dalka gudahiisa iyo dibaddiisaba.
3. Maareynta iyo isuduwidda Barnaamijyada deeqaha sama-falka si loogu fuliyo qorsheyaasha heer Qaran.
4. Isku-xirka iyo kormeeridda hay'adaha ka shaqeeya arrimaha afooyinka kuwa dalka iyo kuwa caalamiga ahba.
5. Idku-duba-ridika hay'adaha gurmada ku yimaada, sida kuwa maxaliga ah iyo kuwa shisheeye.
6. Maaraynta iyo maamulka hawlaha la xiriira daryeelka dadka iyo deegaanka ay saameeyeen masiibooyinku.
7. La-socodka iyo hubinta wax-qabadka dhammaan Hay'adaha ku hawllan meesha ay masiibooyinku ka dhaceen iyo u fududaynta xariirka xagga Dawladda.
8. Kor u qaadidda aqoonta guud & wacyigelinta dadweynaha ee ku aadan arrimaha Maaraynta masiibooyinka iyo dhismaha kartida wax qabad ee dhammaan hay'adaha iyo dadka la tacaalaya masiibooyinka.
9. U-gudbinta Wasiirka wasaaradda arrimaha gudaha iyo Madaxda Qaranka warbixino joogta ah ee ku saabsan xaaladaha masiibooyinka iyo talooyinka habka ugu fudud oo looga hor-tegi karo ama loo maareyn karo.
10. Iyo howlihii kale ee loogu xilsaaro sharci ama ay u xilsaaraan Guddiga Maaraynta Masiibooyinka Qaranka.

Qodobka 8aad:

Dhaqaalaha iyo Xisaabaadka hay'adda

1. Hay'addu waxay lahaanaysaa Miisaaniyad-sanadeed si gaar ah loogu qoondeeyo oo isugu jira mushaaraadka shaqaalaha, hawl-socodsiinta (running cost).
2. Hay'addu waxay abuuraysaa Sanduuq dhaqaale oo ay ka qaybgalayaan Ganacsatada & dadweynaha Soomaaliyeed oo loogu tala galayo ka jawaabidda degdega ah (emergency response) ee Masiibooyinka dalka la soo gudboonaada.

3. Sanduuqa heer D/Goboleed ee ka jawaabidda degdega Musiiibooyinka ka dhaca D/goboleedka dhexdeeda.
4. Sanduuqa heer Degmo ee ka jawaabidda degdega Musiiibooyinka ka dhaca Degmada dhexdeeda.
5. Miisaaniyadaha Wasaaradaha in ay ku darsadaan Mashaariicda ka hortagga & yareynta khataraha Masiibooyinka ka dhaca dalka.
6. Waxaa kaloo ilaha dhaqaalaha ka mid noqonaya lacagaha loogu deeqo hay`adda oo loogu tala galay in lagu fududeeyo howlaha Maaraynta masiibooyinka.
7. Hay`addu waxay yeelanaysaa hab-xisaabeed hufan oo u diyaarsan kormeer iyo baarista Hanti- dhawrka Qaranka sanadkiiba mar iyo markasta oo loo baahdo.

Qodobka 9aad:

Shaqaalaha Hay`adda iyo Mutadawiciinta

1. Shaqaaleynta iyo maamulidda shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn ee Hay`adda waxay ku jaan go`naan doonaa si waafaqsan Sharciga shaqaalaha rayadka ah ee Dowladda iyo sharciyada hay`adaha madaxa banaan.
2. Mutadawiciinta heer qaran & degaan ee qof ama koox ka tirsan shirkadaha, ururada aan dowliga ahayn, hey`ado waxbarasha iwm oo doonaaya in ay xoogooda farsamo iyo midkooda aqooneed si mutadawacnimo ah ugu biiriyaan howlaha Maaraynta masiibooyinka. Hay`addu waa soo dhaweeyneysaa waana diwaan gelinaysaa.

Qodobka 10aad:

Soo-saarid Xeer-hoosaadyo

1. Hay`addu waxay yeelanaysaa xeer-nidaamiye u gaar ah oo faahfaahinya Qaab-dhismeedka iyo maamul-hoosaadka hay`adda oo aan ka hor imaanayn sharcigan.
2. Hay`addu waxay soo saareysaa xeer-nidaamiye si gaar ah u fahfaahinaya arrimaha la xiriira maamulka maaliyadda iyo dhaqaalaha guud ee hay`adda.
3. Hay`addu waxaa kaloo diyaarinaysaa xeerka maamulka mutadawiciinta Maaraynta masiibooyinka ee heer qaran, Dowlad Goboleed iyo Degmaba.

Qodobka 11aad:
Baabi'in

Waxaa la baabi'yey wixii shuruuc ama xeerar ka hor imaanaya ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 12aad:
Dhaqan-gal

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa marka uu Baarlamaanka Federalka ansixiyo, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Tusmo

Qodobka 1aad: Dhismaha Hay`adda.....	1
Qodobka 2aad: Aragtida & Fariinta Hay`adda.....	1
Qodobka 3aad: Ujeedooyinka Hay`adda.....	2
Qodobka 4aad: Mabaadi`da Hageysa hey`adda.....	2
Qodobka 5aad: Xasaanadda ay leedahay Hay`adda.....	3
Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Hay`adda SODMA.....	3
Qodobka 7aad: Howlaha iyo awoodaha Hay`adda.....	3
Qodobka 8aad: Dhaqaalaha iyo Xisaabaadka hay`adda.....	4
Qodobka 9aad: Shaqaalaha Hay`adda iyo Mutadawiciinta.....	5
Qodobka 10aad: Soo-saarid Xeer-hoosaadyo.....	5
Qodobka 11aad: Baabi`in.....	6
Qodobka 12aad: Dhaqan-gal.....	6